



Habka SEPA

Xabsiga Dowladda Hooes ee Seattle

Maxay tahay SEPA?

- SEPA Waxa weeye State Environmental Policy Act (Sharciga Siyaasada Deeganka ee Gobolka) waa sharci gobol oo u tilmaama hey'adaha in ay tixgeliyaan macluumaadka deegaanka ka hor inta aanan la go'aamin qaadashada ficil dariiq ee gaar ah ee mashruuc iyo isla markaana ku dhiiri gelidda dadweynaha in ay ka qaybqaataan talooyinka hey'aaa.
- Mashruucyada ku yaal magaalada Seattle, Magaaladu sida caadiga ah waxa ay hirgelisa habka SEPA. Magaaladdu waxa ay awood u heysta in ay go'aamiso haddii Environmental Impact Statement (EIS) (Bayaanka Raad-reebka Deegaanka) looga baahanyahay mashruuc oo ku yaala gudaha xadka magaalada.

Waa maxay EIS?

- Environmental Impact Statement (EIS) waxa weeye ulajeeddo, aan eex lahayn oo qiimeeya waxyeelada ka imaanka kara mashruuc la soo-jeeday.
 - EIS waxa weeye qalab ay isticmaalan Magaalada, hey'adaha kale iyo dadweynaha ee habka tala-goynta.
 - EIS ma bixiso talo ka u-jeeda and ka sii-jeeda qaaditaanka ficil gaar ah.

Maxay yihiin tilaabooyinka weyn ee habka EIS?

- 1) Xadaynta – ugu yaraan mudo 21 maalmood ayaa loo baahanyahay in dadweynuhu ka faaleeyo.
- 2) Qoralka koowaad EIS – waxa ku jira mudo ka faalayn dadweynaha ee 2^{aad} (30 ila 45 maalmood).
- 3) Ugu-dambayn EIS

Waa maxay ujeeddada xadaynta ee EIS?

- Xadayntu waxa ay siisa hey'adaha ogeysiis, ururada iyo dadweynaha in EIS loo diyaarin doona mashruuci la soo jeediyo.
- Qorshaynta xadayntu waxa weeye in ay uruuriso faalooyinka dadweynaha iya hey'ada ee ku saabsan arrimaha deegaanka iyo talantaalayada loo jeedin karo EIS.

Sidee buu dadweynuhu u bixin karaan taladooda waqtiga xadaynta?

- Magaaladu dhawaan bay sheegi doonta mudada faalo bixinta xadaynta. Waxa la filaya xadayntu in ay bilaabato dhammaadka kulaylaha. Waxa jiri doona laba shir ee xadaynta mudadan ee loogu tala galay in dadweynuhu tallo ka dhiibtaan.
- Talo ka bixinta xadaynta ee EIS waxa iyada oo hadal ah laga dhibi kara shirarka dadweynaha ama iyada oo qoral ah ayaa la dhibi kara gudaha mudada faalaynta. Wixii faahfaahin ah ee meesha loo diri laha faalooyinka waxa bixin doona marka mudada xadaynta is rasmi loogu dawaayo.

Maxa dhici ka dib Xadaynta?

- Iyada oo ku salaysan faalooyinka la helay waqtigii habka xadaynta, Magaaladu waxa ay dhammaystiri doonta xadaynta EIS.
- Magaaladu ka dib waxa ay amri doonta diyaarinta qoraalkii koowaad ee EIS.

Waa maxay Qoraalka Koowaad ee EIS?

- Qoraalka koowaad ee EIS waxa weeye falanqayn aad u tafaqtiran ee ugu horeysay ee Magaalada oo ku saabsan raad-reebyada dhawr talantaaliyaal ee kale duwan ee mawduucyo taxan, sida ciidaha, dhulalka-qoyen, isticmaalka dhulka, booqa, gaadiidka, iwm.
- Qoralka Koowaad waxa la siiya oo loo qaybiya hey'adaha, ururada, iyo dadweynaha in ay dib u-eegaan iyada oo isla markaana qayb ka mudada faalada labaad ee dadweynaha.
- Shirka ama shirarka dadweynaha waxa la qabta marka la sii-daayo Qoralka Koowaad ee EIS si loo ururiyo faalooyinka ku saabsan Qoralka Koowaad ee EIS. Faalooyinka Qoraalka Koowaad ee EIS waxa iyada oo hadal ah laga dhibi kara shirarka dadweynaha ama iyada oo qoral ah ayaa la dhibi kara gudaha mudada faalaynta.

Waa maxay Ka ugu Dambeeyey ee EIS?

- Iyada oo ku salaysan faalooyinkii laga helay Qoraalkii Koowaad ee EIS, ka Ugu Dambeeyey ee EIS waxa loo diyaariya sida kii saddexaad iyo tilaabadii ugu dambaysay ee habk EIS. EIS Ugu Dambeeyey waxa bixiya jawaabihi faalooyinkii laga helay Qoralkii Koowaad ee EIS oo ka yimid hey'adaha, ururada iyo dadweynaha, waxa laga yaabana in u ku jiro caddaynno ku saabsan falaqaynta raad-reebyada deegaanka.
- Qoralka Koowaad iyo ka Ugu Dambeeyey oo wadajira waxa ay ka koobanyihiin dukumeenteeda Magaaladu isticmaali doonta – iyo falanqaynyadii kale iyo talooyinkii dadweynaha – ee xulashada goob loogu tala galay xabsiga dawladda hoose ee Seattle iyo go'aamadii kale ee ku saabsan mashruuca.

Waa maxay jawalka la rajeynayo ee EIS?

- Xadayn – la qaban doono kulaylahan 2008
- Qoralka Koowaad ee EIS – waxa la bixin doona rubuca hore 2009
- Ugu Dambeeyey EIS - waxa la bixin doona gu'ga 2009

Maxa dhici ka dib ka Ugu Dambeeyey ee EIS?

- Duqa Magaalada wuxu samayn doona tala-bixin uu u jeedinayo Gudiga Magaalada ee ku saaban mashruucii xabsiga dawladda hoose ee Seattle.
- Gudiga Magaaladu waxa ay qaadi doonaan dib u-fiirin iyaka u gaar ah oo ku saab ikhityaarada xabsiyada oo ay ku jirto fursado rasmi ah ee dadweynuhatalodooda ku dhiibtaan.
- Fursado joogto u soconaya ee dadweynuhu taaladoodu ku dhiibanayaan ayaa dhici doona oo ka mid ah habka tala goynta.
- Gudiga Magaalada waxa ay samayn doonan go'aankii ugu dambeeyey meesha xabsiga cusub laga dhisi doono.